

Maxaa aynu sameyn karnaa?

Marka ugu horeysa, waxa ugu muhiimsan ee aynu sameyn karno waa in la yareeyo qadarka qashinka ah ee aynu tuurno.



Dad baa xiitaa isku daya inay noqdaan “qashin eber” ama qof aan qashin lahayn. Taa waa aynu sameyn karnaa haddii aynu doorasho fiican ku sameyno waxa aynu iibsanaayno iyo sida aynu wax u qabano. Tusaale ahaan, Charles waxa uu isticmaalaa darmuus ama falaas si uu kafee shaqada ugu qaato, sidaa daraadeed ma isticmaalo ama tuuro koobab warqad ah.




Saaxaabadiisa Mary waxay jeceshay inay biyo cabto. Waxay maalin kasta biyaha ka iibsan kartaa mishiinka wax iibiya ka dibna waxay dhalooyinka ku tuuri kartaa haanta dib-u-dhaqangalinta. Hase yeeshe lacag ayaa u dhiganta waxana ay yareysaa qashinka marka ay dhalo biyo oo dib loo isticmaali karo guriga ka keento.



Adiga naftaadu waad yareyn kartaa qashinka. Wakhtiga ku xiga ee aad dhaqidid gacmahaaga waxa aad kala dooran kartaa qalajiyaha koronto ku shaqeeya iyo warqadda masaxaadda, waxana fiican inaad isticmaashid qalajiyaha korontada ku shaqeeya. Ma abuuri doontid wax qashin ah sidaa daraadeedna wax aad tuuri doonto ma jiro oo xaaladdu waa “qashin eber”.



Dib u isticmaal alaabta halka aad ka tuuri lahayd. Tusaale ahaan, dadka intooda badani waxay todobaad kasta dukaanka ka soo qaataan baco. Bacahaa dib baa loo dhaqangalin karaa, laakiin waxa ka sii fiican inaynu dib u isticmaalno wakhtiga ku xiga ee aynu dukaanka ka soo adeeganayno. Uma baahnin in aynu dib u dhaqangalino ama tuurno ilaa laga gaadho heer aan dib loo isticmaali karin.



Marka alaabta aynu iibsano aan lagu helin weel dib loo isticmaali karo, doorashada ugu fiicani waxa weeye innaga oo ku iibsana weel dib loo dhaqangalin karo. Xaaska Charles waxay jeceshahay inay cabto Kooka Kola. Waxay iibsataa dhalooyinka balaastigga ah ee leh furka la maroojiyo, si haddii aanay dhameyn dhalada ay ugu ridi karto qaboojiyaha oo ay mar dambe u cabi karto.



Marka dhaladu madhato waxa lala dhaqangaliyaa dhalooyinka kale ee balaastigga ah ee ay helaan marka ay soo iibsadaan caano iyo miirka khudaarta. Waxa kale oo ay dib u dhaqangaliyaan dhalooyinka quraaradda ah iyo daasadaha aluuminayamka. Adiga naftaadu sidaa waad sameyn kartaa.



Marka alaabta dib loo dhaqangaliyo waxa la geeyaa warshad halkaasoo lagu isticmaalo si looga sameeyo alaab cusub. Daasadaha aluuminayamka ah dib ayaa loo dhaqangalin karaa si looga sameeyo daasado cusub, sanduuqyada gaboobay dib baa loo dhaqangaliyaa si looga sameeyo sanduuqyo cusub, isla markaana dhalooyinka iyo joogaga balaastigga ah dib ayaa loo dhaqangaliya si looga sameeyo dhar, qori iyo qadiifado.



Marwalba xusuuso in aad iibsatid kaliya waxa aad awoodid in aad isticmaashid, oo aad dib u isticmaashid wixii aad dib u isticmaali kartid ama aad siisid qof kale oo isticmaali kara, isla markaana aad dib u dhaqangalisid wax kasta oo ay suurogal tahay in dib loo dhaqangaliyo. Sameynta waxyabaahasi waxay si weyn u yareyn doontaa qadarka qashinka ah ee aad tuurtid, taasoo inaga gargaari doonta in aan ku sii dhawaano hadafkeena ah “qashin eber” ah.

